



Diiwaangelinta Adeegga Xulashada: Jawaabaha Su'aalaha Caadiga ah

[S] Ayey tahay inuu is diiwaangeliyaan?

[J] Sharciga federaaliga ah ayaa dhigaya in ku dhawaad *dhammaan* ragga ku nool Maraykanka ee da'doodu u dhexeyso 18 jir iyo 26 jir ay isku diiwaangeliyaan Nidaamka Adeegga Xulashada (Selective Service System). Waxaa kuwaas ka mid ah shakhsiyaadka aanan dhalashada dalka haysanin iyo kuwa laba waddan dhalasho ka haysta, si kastoo uu yahay sharciga haajiraadda ee ay haystaan. Waxaa diiwaangelinta ka reeban oo keliya dadka aanan dhalashada dalka haysanin ee ku jooga dalkugalka ardayda ama booqdaha, ama qayb ka ah ergeyda siyaasiyiinta ama ganacstada.

[S] Goorma ayay raggu u baahan yihiin in ay is diiwaangeliyaan?

[J] Nin kastoo deggan Maraykanka muddo ka badan 30 maalmood waqtiga ay da'diisu u dhexeyso 18 jir iyo 26 jir ayaa laga sugayaa in uu is diiwaangeliyo. Haddii nin uu gaaro 18 jir muddada uu Maraykanka joogo, waxaa laga sugayaa in uu isku diiwaangeliyo 30 maalmood gudahood ka dib maalin dhalashadiisa. Diiwaangelinta lala raago waxaa la aqbalayaa ilaa maalinta ninku uu gaarayo 26 jir.

[S] U-qalmista dhalashada dalku ma ku xiran tahay diiwaangelinta Adeegga Xulashada?

[J] Ragga muhaajiriinta ah ee raba in ay qaataan dhalashada dalku waa in ay ku jiraan Nidaamka Adeegga Xulashada haddii ay Maraykanka ku noolaayeen muddo ka badan 30 maalmood intii ay da'doodu u dhexeysay 18 jir iyo 26 jir. Kadib marka ninku uu gaaro 31 jir, loogama baahna in uu isku diiwaangeliyo Adeegga Xulashada si uu dhalashada dalka u helo. Hase yeeshee, waxaa jira fursado kaloo farabadan oo muhiim ah oo ku xiran diiwaangelinta.

[S] Waa maxay fursadaha kalee ku xiran diiwaangelinta?

[J] Ragga laga sugayo in ay is diiwaangeliyaan ee sidaas samayn waaya UMA qalmayaan fursado gaar ah. Waxaa kuwaas ka mid ah:

- ✓ Amaahyada ardayda ee federaaliga ah;
- ✓ Gelista barnaamijyada tababbarka shaqada ee dawladda federaaliga ah ay maalgeliso;
- ✓ Shaqo ay ka helaan dawladda Federaaliga ah, hay'ado farabadan oo gobolka iyo dawladda hoose ka mid ah, iyo qaar ka mid ah loo-shaqeeyayaasha khaas ah; iyo
- ✓ Helitaanka ama cusboonaysiinta laysinnada baabuurta ee gobollada intooda ugu badan.

Ragga iyagu is diiwaangelin waaya illaa maalinta dhalashadooda 26^{aad} waxaa **weligood laga horjoogsan karaa** in ay fursadahaas helaan. Sharcigu waxa uu weliba dhigayaa in ragga is diiwaangelin waaya la saari karo ganaax illaa \$250,000 ah, iyo weliba xabsi illaa shan sano ah.

[S] Sidee ayay raggu isku diiwaangelin karaan?

[J] Ragga haysta lambarka Sooshiyal sekuyuurati waxay iska diiwaangelin karaan internetka halkan www.sss.gov. Ragga aan haysanin Lambarka Sooshiyal Sekuyuurati, ama aanan kumbiyuutar heli karin, waxay isku diiwaangelin karaan foom diiwaangelin oo ay ka buuxiyaan xafiis kastoo boosted oo Maraykanka ku yaalla.

[S] Nidaamka Adeegga Xulashada miyuu qayb ka yahay militariga?

[J] Maya. Nidaamka Adeegga Xulashada waa hay'ad rayid ah. Ragga iska diiwaangeliya **isma** qorayaan ciidanka militariga.

[S] Halkeen war dheeraad ah ka heli karaa?

[J] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Diiwaangelinta Adeegga Xulashada waxaa laga heli karaa halkan www.sss.gov.